

DUGSIYADA DADWEYNAHA BOSTON



XAFIISKA AGAASIMAHA GUUD

Oktoobar 26, 2007

Gacaliye Qoysaska iyo Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Boston:

Waxan idiinku soo qoray inaan idiin ka waramo arrin ku saabsan caafimaadka oo fiiro balaaran ka helaya warbaahinta (media) oo run ahaantii waalidka welwel gelin karta: waa cudurka fida ee la dhaho “*methicillin-resistant staphylococcus aureus*” (MRSA), ama caadiyan loo yaqaan **faafaha “Istaaf” (“Staph” infection)**. Degmada dugsiyadu waxay si isku xiran ula shaqaynaysaa hay’adaha caafimaadka dadweynaha, kaalisoooyinka dugsiyada, iyo dadka kaleba si loo gaarsiiyo qoysaska iyo shaqaalaha xogta ku saabsan siyaabaha sahlan ee lagu caawinayo ardayda si loo dhimo khatarta qaadida cudurkan.

Xaqiiqada ku taal xaanshida ku lifaaqan ee ka timid Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Massachusetts waxay bixinaysaa xog muhim ah xaga qaadida cudurka, iyo istaraatiijooyinka micnaha leh ee kugu caawin kara si loo yareeyo khatarta caafimaad. Waxa kalee laga helayaa xog dheeraad ah ee gaar ahaan khusaysa dugsiyada “website”-yada:

Xarumada Xakamaynta Cudurada (Centers for Disease Control):

<http://www.cdc.gov/Features/MRSAinSchools/>

Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Massachusetts:

http://www.mass.gov/dph/cdc/antibiotic/mrsa_school_health.htm

Fadlan kalsooni ku qab in caafimaadka iyo badbaadada ardadeena iyo shaqaaluhu ay yihiin waxa ugu sareeya aan danayno. Hadaad wax su’aalo ama welwel ah qabto, fadlan la xiriir dhakhtarka qoyska ama kaalisada dugsigaaga.

Si gacaltooyo ah,

Dr. Carol R. Johnson
Agaasimaha Guud

Lifaaqa la socda